

**DOWLADDA SOMALIYA**  
**XEERKA Lamb. 119 EE 28 DISEMBER 1956**  
**DHISMAHA ADEEGA ARRIMAHA DIBEDDA EE**  
**MAAMULKA WALAAYADDA**  
**MAAMULAHA**

KADIB markii la arkay sharciga lamb. 1 ee 7 Maay 1956 oo dhisaayey Dowladda Somaliya

KADIB makii laga baaran degey dekreeto lamb. 78 ee 18 Maay 1956dii ee khuseeya hab nidaamiyaha Dowlada Somaliya;

IYADOO la tixgeliyey amar-sharci lamb. 9 ee 5 Abriil ee 1954 oo ku saabsan hab nidaamka shaqaalaha dowladda Somaliyeed;

IYADOO la tixgeliyey dekreetada lam 153 ee 27 Nofeember 1954 ee ku saabsan hab nidaamka saraakisha dowladeed;

IYADOO la arkay dekreetada lamb. 247 ee 22 Diseember 1955 oo ansixiyey Xeerka Shaqqalaha madaniga ah ee dowladda Somaliyeed;

IYADOO la tixgeliyey baahida loo qabo in la dhiso Adeega Arrimaha Dibedda si loo diyaar gareeyo shaqaale u qalma fulinta howlaha diplomasiinta iyo qunsuliyadaha,

IYADOO la dhegeystay talada Golaha Wasiiradaha;

IYADOO la tixraacay soo jeedinta Raisul Wasaaraha.

**WUXUU AMRAYAA:**

**Qod. 1**

Waxaal laga dhisay Golaha Maamulka Walaayada, Adeega Arrimaha Dibedda kaas oo shaqaale loo qori doono oo ka qeyb geli doono tartan iyo qiimeyn shahadooyinkooda.

**Qod. 2**

Wasiirak Arrimaha Guud ayaa soo bandhigi doona qaabka tartan kaasi.

Muqdisho, 28 Diseember 1956.

Maamulaha Guud  
**P. Franco**

**Abdullahi Issa Mohamud**

Xafiiska Xisabaha: **TURA**

Eeg lamb. 779 ee 28 Disember 1956

Madaxa Eeg iyo diwaan. lamb 21 bogga 121.

Muqdisho 29 Disember 1956

Xisabiyaha Guud: **SPADARO**